KA-HORTAGGA JADEECADA

KAHOR IYO KADIB SAFARKA

Jadeecadu waxay noqon kartaa mid khatar ah, gaar ahaan dhallaanka iyo ilmaha yaryar. Jadeecada daran waxay horseedi kartaa isbitaal-dhigis iyo xitaa dhimasho.

Jadeecada ayaa weli aad ugu badan qaybo badan oo dunida ka mid ah. Qofkasta oo aan si buuxda uga tallaalnayn jadeecada oo u safra caalamka ama goob ay ka jirto jadeeco qofkaasi waxa uu ugu jiraa khatar.

Waxaad naftaada iyo carruurtaada jadeecada uga ilaalin kartaa tallaalka jadeecada, qaamow-qanshiirka, rubella (MMR).

Waxa la sameeyo KAHOR safarka caalamka

1. **La hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada, ama rugtaada caafimaadka si aad u xaqiijiso in qofkasta uu ka difaacan yahay jadeecada.**
2. **Qaado tallaalka ugu yaraan 2 toddobaad ka hor inta aadan bixin.**
   - Dhallaanka da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 11 bilood waa inay qaataan hal kuuro oo tallaalka MMR ah.
   - Qofkasta oo 12 bilood jir ah iyo wixi ka wayn (oo ay ku jiraan dadka qaangaarka ah) waa inuu qaato wadar ahaan 2 kuuro ka hor inta uusan safrin.
     - Haddii aadan horay u qaadan tallaal, qaado kuurada 1aad isla markaaba. Waxaad kuurada 2aad qaadan kartaa 28 maalmood kadib.
     - Haddii aad horay u qaadatay 1 kuuro, qaado kuurada 2aad ka hor inta aadan safrin.
3. **Xitaa haddii safarkaaga ay ka dhiman tahay wax ka yar 2 toddobaad, weli waad qaadan kartaa 1 kuuro oo tallaalka MMR ah.**

Haddii aad qorshaynayso inaad u safarto meel ka mid ah Maraykanka oo ay jadeeco ka dillaacday, la hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada, ama rugtaada caafimaadka si aad u xaqiijiso in qofkasta uu ka difaacan yahay jadeecada.

Waxa la sameeyo KADIB safarka caalamiga ah ama u safridda goob ay ka dillaacday jadeeco

1. **Iska fiiri calaamadaha jadeecada muddo 3 toddobaad ah kadib markaad laabato. Jadeecadu waa mid aad u faafta waxayna dadka kale ugu gudbi kartaa si degdeg ah.**
2. **Wac dhakhtarka ama rugta caafimaadka ISLA MARKAABA haddii:**
   - Aad u malaynayso in adiga ama canugaaga la soo gaarsiiyay jadeeco.
   - Adiga ama canugaaga la jirrado xanuun leh finan iyo qandho. U sheeg dhakhtarkaaga meeshi aad u safartay, iyo haddii adiga iyo canugaagaba aad qaadateen tallaalka MMR.
3. **Haddii adiga ama canugaaga la xanuunsan yahay xanuun leh finan iyo qandho jooga guriga ilaa aad kala hadashaan dhakhtar ama rug caafimaad.**

WAXBADAN KA OGOW

cdc.gov/measles/travel